

Haweenka, Dhalaanka iyo Carruurta (WIC) Shirka/Codsiga Dhegaysiga Xaqa ah. (Conference/Fair Hearing Request)

NEW YORK STATE DEPARTMENT OF HEALTH
Division of Nutrition

Si aad uga qalanto WIC waa in aad:

- Ahaado:
 - Haween kasta oo uur leh
 - haweenayda dhashay ilmo lix sanadood ka hor,
 - Hooyada naasnuujinaysa ama ilmaha ilaa da'da hal sano.
 - Ilma yar ama dhalaan ilaa da'da shan sanadood ah.
- Ku noolaataa Gobolka New York;
- Dakhli haysta ama ka hooseeya heerarka qaybta ee dowladda federaalka ah, ama hela dheefaha food stamps (SNAP), Medicaid ama Caawimada Ku meel gaadhka ah ee Qoysaska Baahan (TANF).
- Qaba baahi caafimaad ama nafaqo.
- Haysta caddaynta aqoonsiga

Haddii codsigaaga dheefaha la diiday ama dheeftaada la joojiyay, waxaad codsan kartaa kullanka si loo beddelo go'aanka (rafcaanka). Kullanka waxa aloogu yeedhaa shir. Haddii dhibaataada aan lagu xalin shirka, waxaad leedahay dhegaysiga xaqa ah. Dhageysiga xaqa ah waa fursad aad u leedahay inaad garsoore u sheegto sababta aad ugu malaynayso go'aanku inuu khaladyahay.

Shirka

Adiga, ama qof kuu hadlaya adiga, waxa uu waydiinsan karaa (qof ahaan ama qoraal ahaan) wakaalada maxaliga ah ee WIC shirka. Waxaad waydiisan kartaa dhegaysi gudaha 7 maalmood marka codsigaaga la diiday ama marka lagu sheegay dheefahaagu inay joogsan doonaan. Haddii aad ku waydiin waydo 7 maalmood, waxaad waayi doontaa dhegaysiga xaqa ah.

Markaad codsiga samayso, wakaalada maxaliga ah ee WIC waxay ku ogaysiin doontaa taariikhda, wakhtiga, iyo goobta shirka. Adiga, ama qofka kuu hadlaya, waxa uu sheegi karaa dhinacaaga shirka. Qofka adiga kuu hadlayaa waxa uu noqon karaa qaraabo, saaxiib, qareen ama qof kale. Shirku waa in la qabtaa gudaha toban maalmood laga bilaabo codsigaaga.

Xaga shirka, waxaad waydiin kartaa sababta codsigaaga lo diiday, ama sababta dheefahaaga loo joojiyay. Waxaad waydiin kartaa inaad macluumaadka ka aragto faylkaaga. Oo waxaad keeni kartaa macluumaad si aadu muujiso in go'aanka wakaalada uu khaldanaa.

Dhegaysiga Xaqa ah

Adiga, ama qofka adiga kuu hadlayaa, waxa uu waydiinsan kara (qof ahaan ama qoraal ahaan) dhegaysi xaq ah, Waxaad waydiisan kartaa dhegaysi gudaha 60 maalmood marka codsigaaga la diiday ama marka lagu sheegay dheefahaagu inay joogsan doonaan. Haddii aad ku waydiin waydo 60 maalmood, waxaad waayi doontaa dhegaysiga xaqa ah.

Muddada caddaynta waa ilaa inta aad heli doonto dheefaha WIC. Haddii dheefahaaga la joojiyo badhtanka muddada caddaynta oo aad waydiisato dhegaysiga gudaha 15 maalmood, dheefahaaga WIC way sii socon doonaan ilaa dhegaysiga natiijadiisa la ogaado ama ilaa dhammaadka muddada caddaynta, ku kasta oo soo hor dhaca.

Waydii dhegaysiga Wakaalada maxaliga ah ee WUC (shaqaalaha waxay ku caawin doonaa adiga) ama la xidhiidh Barnaamijka NYS WIC.

boostadda:	WIC Program Director	telefoonka:	(518) 402-7093;
	NYSDOH, Riverview Center	fagas:	(518) 402-7348; ama
	Room 650, 150 Broadway,	iimaylka	NYSWIC@HEALTH.NY.GOV
	Albany, NY 12204		

Waxaa lagu soo diri doonaa taariikhda, wakhtiga, iyo goobta dhegaysiga. Garsoore xaq soor ah waxa uu ka masuul ahaan doonaa dhegaysiga. Garsooruhu waxa uu go'aan ka gaadhi doonaa haddii go'aanka in ladiido codsigaaga ama la joojiyo dheefahaaga WIC ay sax ahayd. Adiga, ama qofka kuu hadlaya, waxa uu sheegi karaa dhinacaaga dhegaysiga. Qofka adiga kuu hadlayaa waxa uu noqon karaa qaraabo, saaxiib, qareen ama qof kale.

Ka hor iyo muddada dhegaysiga adiga, ama qofka adiga kuu hadlaya, waxa uu eegi karaa macluumaadka muujiya sababta go'aanka lid lagaaga dhigay adiga. Muddada dhegaysiga waad hadli kartaa, keeni kartaa maqkhaatiyo iyo caddayn, waydiin kartaa ama beenin kartaa waxa aad maqasho ama aragto, iyo waydiin kartaa su'aalo markhaatiyada. Dhegaysiga waxaa lagu qaban doonaa Ingiriisi. Waxaad u baahan doontaa turjubaan, hal waxa adiga lagu siin doonaa bilaash haddii aad waydiiso Waaxda ugu yaraan toban maalmood ka hor dhegaysiga. Haddii aad ku tegi waydo dhegaysiga, miduun qof ahaan ama qareen ahaan, xaqaaga dhegaysiga waala iska dhaafi doonaa.

Macluumaadka dheeraada ah tixraac 7 CFR § 246.7; 7 CFR § 246.9; 10 CRR-NY 60-1.1 ilaa 1.6; NYS WIC Biigyaraha Barnaamijka #1047, #1100, #1130, #1136.

Haddii codsigaaga dheefaha la diiday ama dheeftaada la joojiyay, waxaad leedahay xaqa dhegaysiga xaqa ah. Dhageysiga xaqa ah waa fursad aad u leedahay inaad garsoore u sheegto sababta aad ugu malaynayso go'aanku inuu khaladyahay. Waxaad waydiisan kartaa dhegaysi gudaha 60 maalmood marka codsigaaga la diiday ama marka lagu sheegay dheefahaagu inay joogsan doonaan. Haddii aad ku waydiin waydo 60 maalmood, waxaad waayi doontaa dhegaysiga xaqa ah.

Muddada caddaynta waa ilaa inta aad heli doonto dheefaha WIC. Haddii dheefahaaga la joojiyo badhtanka muddada caddaynta oo aad waydiisato dhegaysiga gudaha 15 maalmood, dheefahaaga WIC way sii socon doonaan ilaa dhegaysiga natiijadiisa la ogaado ama ilaa dhammaadka muddada caddaynta, ku kasta oo soo hor dhaca.

Waydii dhegaysiga Wakaalada maxaliga ah ee WUC (shaqaalaha waxay ku caawin doonaa adiga) ama la xidhiidh Barnaamijka NYS WIC.

boostadda: WIC Program Director telefoonka: (518) 402-7093;
 NYSDOH, Riverview Center fagas: (518) 402-7348; ama
 Room 650, 150 Broadway iimaylka NYSWIC@HEALTH.NY.GOV
 Albany, NY 12204

Fadlan buuxi macluumaadka hoose

Taariikhda _____

Codsadaha/Magaca Ka qayb galaha (daabac) _____

Cinwaanka _____ AQOONSIGA WIC # (haddii la heli karo) _____

_____ Telefoonka: (_____) _____ - _____

Magaca Wakaalada Maxaliga ah _____

Cinwaanka _____ Telefoonka: (_____) _____ - _____

Sababta Dhegaysiga Codsiga (I=ikhtiyaar ah) _____

Si waafaqsan sharciga xuquuqda aadamaha ee Federaalka iyo Maraykanka. Waaxda Beeraha (USDA) shuruucda iyo xuquuqda aadamaha, USDA, Wakaaladaheeda, xafiisyada, iyo shaqaalaha, iyo hay'adaha ka qayb galaya gudaha ama maamulka barnaamijyada USDA waxaa ka macnuuc ah takoorka ku salaysan isirka, midabka, asalka qaranka, galmadda, naafada, da'ada, ama aarsiga ama aargoosiga wixii hawl madani oo ka horaysa ee barnaamij kasta ama hawasha la qabtay ama ay maalgelisay USDA.

Dadka naafada ah ee u baahan qaab beddel ah oo wada xidhiidhka ah (tusaale, Farta Dhegoolaha, daabacada wayn, cajalada dhegaysiga, Luqadda Maraykanka ee Dhegoolaha, iwm.), waa inay la xidhiidhaan Wakaalada (Gobolka ama degmadda) halka ay ka socdeen dheefaha lacageed. Shakhsiyaadka dhegoolayaasha ah, maqalku ku adag yahay ama leh naafanimada hadalku waxay kala xidhiidhi karaa USDA dhexda Adeega Baahinta Federaalka Lambarka (800) 877-8339. Intaa waxa dheer, barnaamijka waxaa lagu heli karaan luqaddaha aan Ingiriisiga ahayn

Si aad u soo gudbiso cabashada takoorka, buuxi Barnaamijka USDA Foomka Cabashada Takoorka, (AD-3027) ee onlayn lagu helo: http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html, iyo xafiis kasta oo USDA, ama qor warqad cinwaankeeda loo dirayo USDA oo ku bixi warqadda dhammaan macluumaadka lagu codsatay foomka. Si aad u codsato nuqul foomka cabashada ah, wac (866) 632-9992. U gudbi foomkaaga aad buuxisay ama warqadda USDA:

boostadda: U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410;

fagas: (202) 690-7442; ama

iimaylka program.intake@usda.gov.

Hay adan waa adeeg bixiyaha fursada loo siman yahay